

## Muxuu yiri sharcigu?

Swiska waa ka mam nuuc nooc kasta oo gudiinka fircooniaga ama qayb laga gooyo qaybta galmaada gabdhaha sida ku cad (sharcigan qodobkiisa u yahay .124 ). Qof waliba oo sameeya wuxuu mutaysanayaa ciqaab lacageed iyo 10 sanaao oo xarig ah, hadii uu xataa ku sameeyay wadan ka dibadiisa.

Waxaa jira sharci caalimi ah oo lagu mamanuucay isticmaalka gudniinka gabdhaha.

Wixii faahfaahin dheeraad ah naga la xiriir  
[www.excision.ch](http://www.excision.ch)

## Maxaad samayn kartaa?

- - > Ma ka maqashay guditaanka gabdhah qoskiina dhaxdiisa ?
  - > Ma ka cabsanaysaa inaad fasax u aado wadanka aad u dhalatay ?
  - > Gabar saxiibtaa ah ma ku sheegtay arimahaa ?
  - > Hadaad tahay qof ka shaqeeya caafimaadka mase macalin ah oo la kulantay arintan ama su'aalahaa ?

Nalaga soo xiriir xaruunta caafimaadka iyo galamada ee Fribourg si lagaala taliyo laguuuna socdo iyadoo iyadoo la ilaalinayo xogtaada.

## Xaruunta cafimaadka dumarka ee fribourgeois CFSS

Rue de la Grand-Fontaine 50  
1700 Fribourg  
T 026 305 29 55  
[sante.sexuelle@fr.ch](mailto:sante.sexuelle@fr.ch)  
[www.fr.ch/cfss](http://www.fr.ch/cfss)

Wax taageero ku siinayo xaruunta is dhaxgalka dadka so galootiga ah iyo ka hortaga cuusriinimada  
[integration@fr.ch](mailto:integration@fr.ch)  
[www.fr.ch/imr](http://www.fr.ch/imr)



ETAT DE FRIBOURG  
STAAT FREIBURG  
[WWW.FR.CH](http://WWW.FR.CH)



2019 Somali/Somalisch/Soomaalii



**Gudniinka waa  
dhaawaca loo geysto  
xubnaha taranka ee  
haweenka (MGF)**

## **Muxuu yahay gudniinku MGF ama dhaawaca xubnaha taranka ee haweenka ?**

— Waa mid ku saabsan wax kasta oo saameeya ama keena goynta gabii ahaan ama qayb ahaaneed ee xubnaha kore ee taranka dumarka ama wax kasta oo wax u gaynaya xubnahaas taas oo aan ku salays-nayn arin caafimaad. Ama aydoo waxyaabo kale xataa la isticmaalayo.

### **Yuu quseeyaa gudniinku MGF?**

— Gabdhaha iyo dumaka da' kasta oo ay jiraan dadkoo dhan oo qof kastaba ha ahaadee, kuwaas oo u kala dhashay wadamo badan ee Afrikaan ah, Bariga dhexe iyo Asiya. Gudniinku (MGF) wuxuu

saameeyaa mid ka mida sadexdii dumar ah ee jooga qaarada Afrika. Maanta waqtigan la joogo waxaa jira in dadka ka imanaya wadamadaas qaarkood ay ku dhaqmaan lagna helo, kuwo ka la duwan ee ka mida noocyada gudniinka (MGF), wadamada laga helayna waxay ku kala yaalaan Yurub, kuwaas oo uu ka mid yahay Iswiisku, waxay dhan tahay 7000 oo qofood dadka uu dhaqankani saameeyo ee ku nool wadankan.

### **Waa xagee meesha uu ka yimid gudniinku MGF?**

— Ku dhaqankiisuna waxay dadka qaarkiis u samayn jireen una sameeyaan siday u muujin

lahaayeen inay dadka ka mid yihiin si aysan uga duwanaanin dadka kale oo aan loo takoorin iyo siday ugu hogaansanaan lahaayeen qabiilka ay ka dhasheen oo ay ka tirsan yihiin, taasoo qaarkood ay u sameeyaan sidii loo sharafi lahaa loona ixtiraami lahaa. Dadku qaarkood waxay qabaan inay diinuhu farayaan in lays gudo, haba yaraatee diin dhigaysa in lays gudo ma jirto. Gudniiku MGF ma kordhiyo taranka dhalmada wuxuu xataa dumarka la gudo u keenaa inay ku dhacdo oo uu u soo jiido dhalmo la'aan. Habayaraatee ma aha mid kordhiya nadaafada dumarka, iyo siday ku noqon lahaayeen haween aamin ah.

## **Maxay tahay dhibaatada uu keeni karo ?**

— Gudniinku MGF waa mid keena dhibaatoyin aad u xun una daran oo ama isla markaas lala kulmo ama waqtid danbe yimaado.

Dumarku gudani waxay ka cabtaan xanuun aad u daran, dhiig bax badan, hanfaf kulul ama balbal iyo infekshan. Waxaa kale oo waxyeelo daran u gaystaa marka ay dumarku foolanayaan ama dhalayaan, marka laysu tagayo iyo iyadoo xataa maskexiyan ahba.

**Waa mid aad u halis galin kara  
una keeni kara caafimaad daro  
gabdhaha iyo haweenkaba.**